

WARSAXAAFADEED

Guddiga Qabanqaabada wuxuu shaaca ka qaadayaa inuu abaabulayo Kulan Wadatashi ah ee loo wada dhanyahay loona qaban doono sidii lagu dhammeystiri lahaa marxaladda KMG

Nayroobi, 20 Juun 2011 – Guddiga Qabanqaabada ee Kulanka Wadatashiga ee soo socda ee loo qaban doono sidii loo dhammeystiri lahaa Marxaladda KMG ah ee Soomaaliya ayaa maalintii Isniinta qabyay kulankiisii shanaad. Guddigu wuxuu ka koobanyahay wakiillo ka kala socda Dowlaadda Federaalka KMG (TFG), Baarlamaanka Federaalka KMG (TFP), Dowladaha Puntland iyo Galmudug, Midowga Afrika iyo Qaramada Midoobay.

Ujeeddada ugu weyn ee Kulanka Wadatashiga waa in hore loo sii wado geeddi socodka nabadda, iyadoo lagu saleynayo Kulankii Wadatashiga ee Heerka Sare ee la qabtay bishii Abriil, ee uu qabtay Ergeyga Gaarka ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Dr Augustine P. Mahiga, iyo Heshiiskii Kampala, iyo weliba in la ansaxiyo qorshe hawleed lagu dhammeystirayo Marxaladda Kalaguurka.

Guddiga Qabanqaabada way ka go'antahay inuu xaqijiyo in Kulanka Wadatashiga uu noqdo mid loo wada dhanyahay inta la kari karo. Ka sokow Dowlaadda Federaalka KMG, Baarlamaanka Federaalka KMG iyo Dowladaha Puntland iyo Galmudug, kulanka waxaa ka qaybgalaya wakiillo ka kala socda Ahlu Sunna Wal Jama'a iyo dad badan oo kale ee ay arrintu khuseyso oo ka mid ah bulshada Soomaaliyeed.

Kulanku wuxuu isku afgaran doonaa qorshe hawleed iyo qorshe fulin oo qeexaya hawlahu muhimka ah ee loo baahanyahay in la dhammeystiro bilaha soo socda. Hawlahan waxaa ka mid ah dibuhabeyn lagu sameeyo hay'adaha dowlaadda KMG, dhammeystirka iyo ansaxinta dastuurka cusub, dib u soo celinta amaanka iyo dhisidda hay'adaha amaanka qaranka, la xiriirkha dadka iyo dibuheshiisiinta, gaarsiinta adeegyada maamul iyo kuwa bulsho ee asaasiga ah, sare u qaadidda isla xisaabtanka iyo diyaarinta afti dastuur iyo doorashooyin qaran.

Go'aanka kama dambeysta ah ee goobta lagu qaban doono, taariikhda la qaban doono iyo tirada ka qaybgalayaasha waxaa la qaadan doonaa marka la eego qiimeynata amaan ee hadda socota.

Guddiga Qabanqaabada wuxuu ku talajiraa in kulanku uu noqdo mid ay Soomaalidu qabsanayso. Waa inuu mid loo wada dhanyahay.